

Barnaamijka Deeqda Dhaqamada kala Duwan, kuwa Asaliga ah iyo kuwa loo Dhanyahay

Dulmar

Barnaamijka Deeqda Dhaqamada kala Duwan, kuwa Asaliga ah iyo kuwa loo Dhanyahay (Barnaamijka) ayaa taageeraya dadaalada iyo mashaariicda kor u qaadista dhaqamada kala duwan iyo kuwa loo dhanyahay ee lagu dhisayo wacyiga iyo fahanka dhaqamada. Barnaamijka wuxuu kobcinayaa wacyi gelinta dhaqanka ee bulshada ku baahsan gobolka, iyo qadarinta iyo dabaaldega bulshada Asaliga ah iyo dhaqamada kala duwan ee Alberta. Barnaamijka wuxuu ku dadaalayaa inuu abuurdo gobol, oo ay dadka dareemaan inay ka mid yihiin, iyo in dhaqankooda iyo hidahooda qiimeeyo.

Waxaa jira laba durdur maaliyadeed oo kala duwan:

- Dhaqamada kaladuwan iyo mid loo dhanyahay
- Kuwa Asaliga ah

** Fiiri gaar ah: labada waddo ee maaliyadeed waxay raaci doonaan tilmaamaha codsiga ee Barnaamijka Deeqda Dhaqamada kala duwan iyo Midka loo Dhanyahay, shuruudaha codsiga iyo ka warbixinta. Codsadayaasha waxaa laga codsanayaa inay cadeeyaan dhaqaalaha ay ku codsanayaan arjiga.*

Maalgalinta

Ugu badnaan waa \$25,000 doolar

Shuruudaha iswaafajinta waxa u dhigma:

Ogolaanshaha barnaamijka maalgalinta wuxuu ku saleysan yahay iswaafajinta waxa u dhigma. Codsadaha waa inuu ku daraa qaddar u dhigma ama ka badiya codsiga deeqda kharashyada mashruuca.

Iswaafajinta maalgalinta waxay noqon kartaa qaab lacag ah, deeq shaqo (\$20 saacaddii ee kuwa aan xirfad lahayn, \$35 saacaddii ee kuwa xirfada leh), iyo/ama deeq qalab/adeegy (oo lagu xaqiijiyey qiimaha saxda ah ee suuqa), ama iskudarkooda, oo dhamaan la xariira mashruuca.

Ururada u Qalma

- Ururada bulshada ee diiwaangashan oo sucad fiican leh ee ku hoos jira mid ka mid ah xeerarka soo socda:

Sharciyada Gobolka (Alberta)

- Xeerka Bulshooyinka Beeraha
- Qeybta 21 ee Sharciga Shirkadaha Ganacsiga, Shirkado Gobollo Dheeraad ah *
- Sharciga Shirkadaha, Qaybta 9 (Shirkadaha aan faa'udo doonka ahayn)
- Sharciga Maktabadaha
- Xeerka Bulshada ee Alberta
- Sharciga gaarka ah ee Sharci dejinta Alberta

Sharci Dejinta Federaalka

- Sharciga gaarka ah ee baarlamaanka Kanada
- Sharciga Canshuuraha Dakhliga (ee Kanada kana shaqeyaa Gobolka Alberta (Ururada samafalka)
- Dadkii Hore (First Nation) ama Deegaanada Métis ee Alberta
- Jaamacad, koleejo, ama machad sida ku qeexan Xeerka Waxbarashada Dugsiga Sare ee Alberta

** Waa inuu lahaadaa cinwaan ku saleysan Alberta oo si joogto ah ula socdo xubin katirsan ururka oo firfircoon.*

Natiijooyinka barnaamijka

Mashaariicda waa inay buuxiyaan mid ama in kabadan natiijooyinka Barnaamijka looga baahanyahay:

- Dadka reer Alberta oo leh fahanka dhaqamo kala duwan
- Dadka reer Alberta way ogyihiin saameynta heybsooca waxayna si wada jir ah uga shaqeynayaan in yareeyo caqabadaha
- Dadka reer Alberta ayaa u dabaaldega sooyaallo kala duwan oo abuuraya bulshooyin soo dhaweyn leh oo loo dhanyahay
- Dadka reer Alberta waxay dareemayaan in la qadariyo dhaqankooda iyo hiddahooda

<https://www.alberta.ca/multiculturalism-indigenous-and-inclusion-grant-program.aspx>

©2021 Government of Alberta | Published: June 2021



Noocyada Mashruuca

- **Tababbarka iyo waxbarashada**, oo ay ku jiraan dadaallada lagu kordhinayo wacyiga dhaqanka, iyo/ama lagu caawiyo dadka reer Alberta inay fahmaan saameynta takooridda oo caqabad ku ah ka qaybgalka buuxa ee dadka ee bulshada:
 - loona marayo waxqabadyo sida aqoon isweydaarsiyo, fadhiyo wareegsan, shirar, wada hadallada bulshada, dadaallada warbaahinta bulshada, ilaha ama aaladaha loogu talagalay isticmaalka bulshada.
- **Dhisidda awooda** ee bulshada oo loo marayo howlo kala duwan:
 - wadaagida dhaqamada rajada leh, cilmi baaris, iyo xog
 - horumarinta xeeladaha lagu taageerayo dhaqamada badan, isdhaafsiga dhaqamada, iyo ka mid noqosho loo dhanyahay
 - Qiimaynta hindisaha jira iyo barnaamijyada lagu tirtirayo caqabadaha si helo barnaamijyadan
 - Kaqeybgalinta taageerayaasha bulshada, khabarada/odayaasha, iyo ka hawlgalayaasha mashruuca.
- **Kordhinta Wacyigelinta Dhaqanka** oo la adeegsanayo dhacdooyinka bulshada ee si firfircoon u dhiirrigeliya kaqeybgalka dadka kala duwan una dabaaldega dharka Asaliga ah iyo dhaqamada kala duwan ee Alberta.

Dhacdooyinka bulshada ee muujinaya waxyaabaha soo socda, ayaa loo tixgelin doonaa:

- ku lug lahaanshaha in ka badan hal koox dhaqameed horumarinta iyo gaarsiinta dhacdada, kobcinta iyo muujinta ka mid noqoshada
- dhacdooyinka sare u qaada wacyiga iyo fahamka kala duwanaanta dadka bulshada
- kor uqaadida firfircoon ee dhaqamada kale si ay ugaqaybqaataan dhacdada
- Kaqeybgalka waxaa u furan dadweynaha guud.

Mudnaanta Sare waxaa la siin doonaa mashaariicda:

- sida ugu fiican u buuxiya shuruudaha tilmaamaha
- leh miisaaniyad hawl gal sanadle ah oo ka yar \$500,000
- Aan helin maalgelin hore ee Dawladda Alberta
- muujiyo kaqeybgalka ururada iskaashiga la leh bulshooyinka ee kala duwan ee horumarinteeda, gaarsiinteeda, iyo dabagalkeeda.

Soo Gudbinta Kahor

Fadlan dib u eeg tilmaamaha Barnaamijka Deeqda Dhaqamada kala duwan, kuwa Asaliga ah iyo Midka loo Dhanyahay iyo Aalada Caawinta Codsiga The (Application Assistance Tool) ee [alberta.ca/multiculturalism-indigenous-and-inclusion-grant-program.aspx](https://www.alberta.ca/multiculturalism-indigenous-and-inclusion-grant-program.aspx). Aalada Caawinta Arjiga wuxuu bixinayaa xog ku saabsan talooyinka qorista arjiga, faahfaahinta liistada hubinta, qeexitaannada, iyo tusaalooyinka mashaariicda.

Soo Gudbinta Codsiga

Doorbididda Emailka: MIIGProgram@gov.ab.ca

Boostada:

Barnaamijka Deeqaha Dhaqamada kala duwan, kuwa Asaliga ah iyo Midka loo Dhanyahay (Multicultural, Indigenous and Inclusion Grant Program)

Dhaqanka Alberta, Dhaqammada kala Duwan iyo Xaaladda Haweenka

Qeybta 212, 17205 - 106A Avenue
Edmonton, Alberta T5S 1M7

Xogta xiriirka

Khadka Wicitaanka Lacag la'aanta ah ee:
1-800-642-3855

Bogga Khadka tooska ah: [alberta.ca/multiculturalism-indigenous-and-inclusion-grant-program.aspx](https://www.alberta.ca/multiculturalism-indigenous-and-inclusion-grant-program.aspx)

Taariikho muhim ah

Wakhtiga kama dambaysta ah ee soo gudbinta:

- Qaadashada 1aad Maarso 1deeda
- Qaadashada 2 - Sebtember 1deeda

Taariikhaha Ogeysiiska:

- Qaadashada 1aad Agoosto
- Qaadashada 2aad Febraayo